# Edbinta Dugsiga ee Ardayda Da'da Yar (PreK-Fasalka 3aad): Maxaa la oggol yahay? Maxay yahiin xuquuqahaygu?

ABLE ADVOCATES FOR BASIC LEGAL EQUALITY, INC.

LAWO LEGAL AID OF WESTERN OHIO, INC.

## Ilmahayga yar miyaa laga joojin karaa ama laga eryi karaa dugsiga dadweynaha?



Inta badan - MAYA. Xaaladaha badankooda waxaad:

- ilmahaaga u diri kartaa dugsiga
- waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aanka dugsiga

## Goorma ayuu dugsiga dadweynahu joojin karaa ilmahayga yar?

Ilmahaaga yar ayaa la joojin karaa ama la eryi karaa haddii:

- Uu ilmahaagu dhismaha dugsiga degmada la yimaado qori ama mindi
- Uu ilmahaagu dhacdo dugsi la yimaado qori ama mindi (Tusaale ahaan: ciyaaraha isboortiga, tababarada, ciyaaraha dugsiga, safarada waxbarashada)
- Uu ilmahaagu waxyeello daran gaarsiiyo qof ama hanti inta uu ku jiro dhismaha dugsiga degmada ama uu joogo dhacdada dugsiga.
- Uu ilmahaagu sameeyay hanjabaad bambo oo ka dhan ah dhismaha ama dhacdada dugsiga.
- Ka joojintu waxay lagama maarmaan u tahay caafimaadka iyo badbaadada degdega ah ee nafta, carruurta kale ama shaqaalaha.

## Miyay xeerarku u kala duwan yihiin dugsiyada dadweynaha ee caadiga ah iyo dugsiyada dadweynaha ee jaartarka (bulshada)?

**MAYA.** Xeerarku waa isku mid dugsiyada dadweynaha ee caadiga ah iyo dugsiyada dadweynaha ee jaartarka (bulshada) Si kastaba ha noqotee, dugsiyada gaarka ah ayaa sameysan kara xeerarkooda gaarka ah, sidaa darteed macluumaadka ku qoran xaashidani waxay kaliya ku saabsan yihiin dugsiyada dadweynaha ee caadiga ah iyo dugsiyada dadweynaha ee jaartarka.

- Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka dhiibato.
- Waxaad xaq u leedahay dhageysi.
- Dugsigu waa inuu ku siiyaa ogeysiiska qoraalka ah ee joojinta ama eryidra.
- Ogeysiiska qoraalka ah waa inuu qeexaa hanaanka racfaanka.

## Dugsiga ilmahayga ayaa ii sheegay inaan ilmahayga ku hayo guriga hal maalin sababta oo ah ilmahaygu wax ayuu sameeyay - laakiin lama joojin ama lama eryin. Miyay sameyn karaan sidaas?

**MAYA.** Ammarka dugsiga ee ah inaad ilmaha ku haysid guriga sababo la xiriira dhaqanka awgood **WAA joojin ama eryid** - xitaa haddii uu dugsigu isku dayo inuu ugu yeero wax kale ("wakhti nafisaad", "nasasho").

## Waa maxay xuquuqahaygu haddii uu dugsigu ii sheego inaan ilmahayga ku hayo guriga hal maalin?

- Codso waraaqo. Waa inaad markasta hesho Ogeysiiska qoraalka ah ee joojinta ama eryida.
- Haddii aanay jirin wax waraaqo ah - u dir ilmahaaga dugsiga. Haddii aanad sidaas sameyn, diiwaanada dugsiga ayaa sheegi kara in ilmahaagu leeyahay "maqnaansho aan la cudur daarin"

Qareennada Sinaanta Sharci ee Aas-aasiga ah (Advocates for Basic Legal Equality, Inc.) iyo Khadka Gargaarka Sharciga ee Galbeedka Ohio (Legal Aid of Western Ohio, Inc.) waa hay'addo sharci oo aan faa'iido doon ahayn oo u adeega baahiyaha sharciga madaniga ah ee dadka iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee ku nool Galbeedka Ohio. Macluumaadkani ma aha tallo sharci. Waa warbixin guud. Ma aha beddelka in xaaladdaada aad kala hadasho qareen (sharci-yaqaan). Waxaad wali u baahan kartaa caawinaadda qareenka. Dib u cusbooneysiintii u danbeysay Nofeembar 19, 19

ABLE ADVOCATES FOR BASIC LEGAL EQUALITY, INC.

LAWO LEGAL AID OF WESTERN OHIO, INC.

TOGETHER, WE DO THE COMMUNITY JUSTICE

Mashruucan waxa lagu maalg
deeq ay bixisay Hay'adda Sam
Sharciga ee Dayton (Dayton L
Heritage Foundation) ee The I
Foundation.

DAYTON LEGAL HERITAGE FOUNDATION

## Waxaan ka walaacsanahay in ilmahaygu u baahan karo adeegyada caafimaadka maskaxda. Waa maxay xuquuqahaygu?



- Maamulaha ilmahaagu waa inuu ka xaqiijiyaa xirfadlaha caafimaadka maskaxda kahor inta aanuu joojin ama ganaaxin ilmahaaga.
- Mararka qaarkood dugsigu waa inuu kuu gudbiyaa dibada dugsiga si aad u hesho adeegyo badan oo caafimaadka maskaxda ah.
- Waxaad damci kartaa inaad dugsiga weydiisato caawino. Mararka qaarkood, degmada dugsigu waa inay bixisaa la-talinta caafimaadka maskaxda iyadoo ah qeyb kamid ah adeegyada waxbarashada khaaska ah.

## Miyuu dugsigu ilmahayga ku dhex ganaaxi karaa dugsiga?

**HAA, LAAKIIN** ganaaxa dugsiga dhexdiisu waa inay ahaatee jawi waxbarasho. Ilmahaagu ma joogi karo daaradda ama xafiiska dugsiga.

## Miyuu dugsigu ii sheegi karaa inaan ilmahayga horay u qaado "ka saarid degdeg ah' awgeed?

**HAA, LAAKIIN** ka saaridda degdega ah waa in kaliya la isticmaalaa haddii uu dugsigu aaminsan yahay in ilmahaagu uu khatar ku yahay naftiisa ama dadka kale. Waxaad codsan kartaa ogeysiiska qoraalka ah ee ka saaridda. LA SOCO: Dugsigu ma bixiyo ogeysiis qoraal ah marka ay ka saaridu tahay wax ka yar hal maalin.

## Intee inle'eg ayay socotaa ka saaridda degdega ah ee ilmaha yari?

Ka saaridda degdega ah ee carruurta yaryari waxay ku dhamaataa wax ka yar hal maalin dugsiyeed oo buuxda. Ilmahaagu waa in loo oggolaadaa inuu ku laabto dugsiga maalin dugsiyeedka xigta.

## Miyuu dugsigu ilmahayga u joojin karaa, eryi karaa ama u saari karaa sababo la xiriira imaansho liidata awgood?

**MAYA.** Ilmahaaga looma joojin karo, eryi karo ama saari karo iyadoo ay sababtu tahay ka maqnaanshaha dugsiga.

## Miyuu dugsiga dadweynaha ee jaartarku u saari karaa ilmahayga sababo la xiriira imaansho liidata awgood?

**Haa.** dugsiga jaartarka ahi wuu saari karaa ilmahaaga kadib markii ay dhacdo 72 saacadood oo maqnaansho aan cudurdaar lahayn ah. Soo qaado waraaqadda- sida waraaqda dhakhtarka- si ay u taageeraan maqnaansho kasta. Hubi inaad u dhiibto dugsiga ilmahaaga. Hayso nuqul.

## Maxaan sameyn karaa haddii ilmahayga la joojiyo ama la eryo?

- **Dalbo** Ogeysiis qoraal ah. Ha u kaxeyn ilmahaaga guriga adiga oo aan helin ogeysiis.
- **Codso** dhageysiga maamulaha. Codsigaaga soo qor. Hayso nuqul.
- **Codso** nuqulka kaydka dugsiga ee ilmahaaga?
- **Uga dood** ilmahaaga dhageysiga. Waxaad dhageysiga u soo kaxeysan kartaa qareen.

# Haddii aad u Baahan Tahay Kaalmo Sharci oo Bilaash ah:

### KA WAC:

Khadka Gargaarka Sharciga ee Galbeedka Ohio:
TALEEFANKA BILAASHKA AH:
(888) 534-1432

### KA DALBO BARTA INTERNETKA:

Bogga internetka ee Khadka Gargaarka Sharciga:
www.legalaidline.org